WAAXDA BARASHADA LUUQADA INGIRIISKA
XARUNTA EMILY GRIFFITH
1860 LINCOLN STREET, 10TH FLOOR
DENVER, COLORADO 80203
TALEEFON (720) 423-2040 - FAKIS (720) 423-8168

DENVER PUBLIC SCHOOLS
Discover a World of Opportunity™

Su'aalaha Marwalba Liska weydiiyo ELA ee Waaladiinta

S: Go'aano noocee ayaan ku sameynayaa diiwaangelinta?
J: Waxaad u dooraneysaa canugaaga barnaamijka hormarinta luuqada oo ku saleysan Foomka su'aalaha Luuqada Hooyo iyo barnaamij adeegyo noocee ayaa laga bixiyaa dugsiga.

S: Ka waran hadii canugeyga iska diiwaangeliyay dugsiga DPS sannado hore? Ma u baahanahay in aan buuxiyo foomamka cusub ee ELA?
J: Waad dooran kartaa in aad cusbooneysiiso foomka Ogolaanshaha Waalidka hadii aad rabtid in aad dooratid dooqa barnaamijka ELA ka duwan, laakin tani looma baahno. Looma baahno foomam kale oo ELA ah in dib loo diro.

S: Maxaan u baahanahay in aan keeno diiwaangelinta?
J: Marka aad iska diiwaangelineysid dugsi cusub, waxaad u baahantahay in aad keento: (1) koobiga shahaadada dhalashada canuga ama baasaboorka; (2) cadeynta cinwaanka, sida kirada ama qarashka korontada; (3) iyo diiwaanada tallaalka hadeer.

S: Canugeyga wuxuu dugsi ka aaday wadanka (_____) iyo wuxuu ku jiray fasalka (___). Canugeyga ma wuxuu ku jirayaa isku fasalkii hadii aan ka diiwaangeliyo isaga/iyada dugsiga DPS?
J: Waxaan ka shaqeynaa in aan ku meeleyno carruurta heerka isku fasalka sida ugu badan oo suurtogalka ah sida ku saleysan taariiqda dhalashadooda.

S: Maxay la micna tahay waxbarashada canugeyga in loo aqoonsado sida EL? Aan aheyn -EL?
J: Hadii canugaaga loo aqoonsado arday luuqada Ingiriiska (EL), isaga ama iyada waxay helayaan adeegyo dheeraad ah ee luuqada (caawin dheeraad ah oo aqrinta, qoraalka, dhageysiga, iyo ku hadalka Ingiriiska). Fasalka ELA, canugaaga wuxuu baranayaa waxbarshada la midka ah isla maadooyinka sida isaga iyada ay ugu jiraan fasalka caadiga ah. Hadii canugaaga loo aqoonsado arday luuqada Ingiriiska aan Aheyn, isaga ama iyada waxaa laga diiwaangelinayaa fasalka caadiga ah.

S: Kawaran hadii canugeyga si qalad ah loo aqoonsado?
J: Hadii aad aaminsantahay in canugaaga si qalad ah loo aqoonsaday, la hadal xoghayaha dugsigaaga iyo ka codso kulan Kooxda ISA ee dugsigaaga.

S: Sida waalid, sidee ayaan qeyb uga noqon karaa wadasheekeysiga Aqoonsiga?
J: Xiliga lagu gudo jiro diiwaangelinta, weydii in aad lahadashadid qofka xiriiriyaha ELA ama maamulaha dugsiga.

S: Hadii canugeyga u guuro dugsi ka duwan, ma u baahanayaan isaga ama iyada in ay maraan nidaamka aqoonsiga markale si markaas ay u helaan adeegyada barnaamijka ELA?
J: Maya. canugaaga wuxuu ahaanayaa mid loo aqoonsaday sida arday luuqada Ingiriiska ilaa isaga ama iyada ay ka buuxiyaan sharuuda looga baxayo barnaamijka ELA.

S: Waxaan warqad ka helay Waaxda ELA oo sheegeyso in canugeyga loo aqoonsaday sida arday luuqada Ingiriiska ah. Maxay tani lamid tahay?

J: Warqadaan waxay kuu sheegeysaa in canugaaga loo aqoonsaday sida arday luuqada Ingriiska ah iyo waxay ku siineysaa sharaxaada warbixinta la xiriirta barnaamijka ELA oo aad canugaaga u dooratay. Intaa waxaa dheer, waxaa ku jira natiijooyinka qiimeynta hadeer ugu dambeysay ee canugaaga qiyaaseyso heerka aqoonta Ingiriiska canugaaga iyo guulaha waxbarashada guud.

S: Maxaan sameyn karaa marka canugeyga lagu meeleeyo fasal aan u saxneyn isaga/iyada?
J: La xiriir maamulaha dugsigaaga iyo weydii in aad la hadashid macalinka canugaaga wax baro.

S: Muxuu canugeyga ugu baahanyahay in uu sameeyo imtixaanka HELITAANKA sannadlaha?
J: Canugaaga waxaa la imtaxaamayaa sannad walbo si loo qiimeeyo hormarkooda aqoonta luuqada Ingiriiska. Isaga ama iyada waxaa laga imtaxaamayaa aqrinta, qoraalka, dhageysiga iyo hadalka. Buundooyinkaan waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu go'aansado hadii canugaaga xaq u leeyahay dib-u doorasho.

S: Canugeyga si xun miyay u saameyneysaa hadi isaga/iyada aysan qaadanin imtixaanka GELITAANKA?
J: Hadii canugaaga uusan ka qeybgalin imtixaanka, isaga ama iyada looma tixgelin karo dib-u doorasho.

S: Maxay la micno tahay goortii canugeyga dib-loo doorto?
J: Goortii canugaaga di-loo doorto, isaga ama iyada waxay buuxiyaan sharuudaha barashada Ingiriiska iyo markale ma helayaan adeegyada luuqada. Intaa waxaa dheer, isaga ama iyada waxaa la kormeerayaa labo sanno kadib dib-u doorashada si loo hubiyo in ay hormarayaan.

S: Canugeyga waxaa loo doortay iyo loo dhaqaajiyay fasalka ka duwan. Ma jirtaa wado walbo oo ay kula joogi karaan isla macalinkii ilaa dhammaadka sannadka dugsiga?
J: Kooxda ISA way ku sameyn karaan taladaan codsigaaga.

S: Maxaa canugeyga loo kormeerayaa xitaa goortii ay buuxiyaan isaga ama iyada aqoonta Ingiriiska?
J: Canugaaga waxaa la kormeeraa labo sanno oo ku xigto dib-u doorashada si loo hubiyo in canugaaga uu sameynayo hormarka waxbarashada iyo uma baahno markale adeega luuqada Ingiriiska si ay ugu guuleystaan fasalka.

S: Maxaa canugeyga dib loogu geliyay adeegyada ELA?
J: Hadii canugaaga uusan sameyneynin hormarka waxbarashada inta lagu jiro waqtiga muddada kormeerida labada sanno, Kooxda ISA laga yaabo in ay go'aansadaan in isaga ama iyada weli u baahanyihiin adeega luuqada. Waalidka waa in ay la xiriiraan kooxda ISA hadii aysan la ogolaanin go'aankaan.

S: Maxay la mid tahay Ka bixida canugeyga?
J: Ardayga la saaray barnaamijka ELA waxaa lagu tixgeliyay aqoonta Ingiriiska buuxda iyo markale ma helayo adeegyada luuqada Ingiriiska ama barashada.